

## **Mawduuca: Xogo cusub oo Ku saabsan Xarunta Dhallaanka ee Starms**

Qoysaska iyo Shaqaalaha Starms ee Qaaliga ah,

Waxaanu kuusoo qoraynaa xogaha cusub ee la xariira shaqada cusboonaysiinta sunta ee ka socota dhismaha dugsigaaga. Waxaa naga go'an inaan ku siino macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan horumarka laga sameeyay Xarunta Dhallaanka ee Starms.

### **Xaalada Shaqada**

Maadaama la dhameeyay rinjiyeynta, xasilinta, iyo nadiifinta Xarunta Dhallaanka ee Starms, Waaxda Caafimaadka Milwaukee ayaa soo kormeertay dhismaha waxayna xaqiijisay in la imaan karo. Hase yeeshee, kadibna marka ay codsadeen bulshada dugsiga, ardayda iyo shaqaaluhu waxay sii wadi doonaan inay tagaan Xarunta Helida Waxbarashada ee Starms inta ka dhiman sannad dugsiyeedkaan. Go'aankaan ayaa la gaaray ka dib markii si taxadar leh loo tixgeliyay iyo si loo ixtiraamo rabitaanka bulshada dugsiga si loo xaddido carqaladaha jira iyada oo dhowr asbuuc ay ka harsan tahay sannad dugsiyeedka.

### **Fursadaha Looga Jawaabo Su'aalaha**

Waxaa lagugu soo dhaweynayaa inaad ka soo qaybgasho kulanka ka dhacaaya hoolka magaalada ee soo socda ee loogu talagalay qoysaska Xarunta Dhallaanka ee Starms, LaFollette School, Brown Street School, iyo Westside Academy. Waxaa si toos ah looga qaybgeli doonaa Arbacada, Maayo 28, markay saacadu tahay 6:00 galabnimo. Wuxuuna ka dhacayaa Dugsiga Dhexe ee Rufus King International, 121 E. Hadley St. Waxaan wadaagi doonaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan hoolka magaalada dhawaan.

Qoysasku sidoo kale waxay su'aalhooda ku hagi karaan ku saabsan Sunta MPS [lead@milwaukee.k12.wi.us](mailto:lead@milwaukee.k12.wi.us) ama Waaxda Caafimaadka Magaalada Milwaukee ayadoo loo maraayo [Foomka MS](#).

### **Talaabooyinka Xigga**

Dugsiyada Dadwaynaha ee Milwaukee wuxuu soo dhejiyay qorshahiisa tallaabada Sunta. Waxaad ka heli kartaa [Webka Warbixinta Sunta ee MPS](#), oo ay wehliyaan macluumaad kale iyo xogo cusub.

Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay dabagal la sameeyaan dhakhtarka ilmahooda ama inay booqdaan rugta caafimaadka ee kumeel gaarka ah si loogu sameeyo qiimeynta joogtada ah ee sunta haddii aysan sidaas horey u sameyn. Si aad u hesho xogaha cusub, goobaha caafimaadka, ilaha caafimaadka Dadwaynaha, booqo [milwaukee.gov/MPS-Lead](http://milwaukee.gov/MPS-Lead) ama [mpsmke.com/mpsleadreport](http://mpsmke.com/mpsleadreport). Ilo dheeraad ah ayaa laga heli karaa bartaan [milwaukee.gov/HEH](http://milwaukee.gov/HEH).

Waxaan uga mahad celinaynaa xubin kasta oo qoyska ka mid ah iyo xubin kasta oo shaqaalaha kamid ah fahamkooda inta aan ka shaqeyneyno inaan hubino badqabka dhammaanteen.

Daacad kuu ah,  
Xafiiska Maamulka Dugsiga